



Warbixinta

Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 43^{aad}

(From 19 July 2020 to 27 September 2020)

November 2020

Ku: - Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL

Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 43^{aad}

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	43 ^{aad}	19/07/2020	27/09/2019

Mudanayaal,

Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan kal-fadhiga 44^{aad} ee iminka aynu galnay isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore oo Goluhu Shaqooyin badan qabtay sida Ansixintii 3 Xeer oo dhaqangalay, Go'aano ama qaraaro Goluhu soo saaray iyo sidoo kale shaqooyinkii Gudiyada Golaha. Hadaba, si aynu u gudano Waajibaadkeena yo hawlaha badan ee inoo yaal darteed waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wax-qabadkii Golaha ee kal-fadhigii 43^{aad} iyo wixii kale ee hawlo ah ama soo kordhay mudaddaas.

Warbixinada Golaha laga hor akhiraayay

Tar.	Warbixinta	Cidii akhridey
25/07/2020	Warbixinta Gudidda Arrimaha Dibada ee Siyaasada Arrimaha Dibada Dalka	Md. C/casiis Ismaciil Ducaale Gudoomo ku-xigeenka Gudidda
26/07/2020	Warbixinta Shirgudoonka	Mr. Cabdirisaaq Siciid Ayaanle
26/07/2020	Warbixinta Gudidda Arrimaha Gudaha ee Wax ka badalka Xeerka Doorashooyinka	Md. C/laahi Xusen Cige Gudoomiyaha Gudidda
08/08/2020	Warbixinta Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga	Md. Cumar Axmed Saleebaan Sanweyne Gudoomiyaha Gudidda
09/08/2020	Warbixinta Wasiirka W. Horumarinta Qorshaynta Qaranka	Md. Xasan Gaafaadhi Wasiirka Wasaarada H. Qorsheynta
23/08/2020	Warbixinta Gudidda Arrimaha Gudaha ee Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka La-dagaalanka Maandooriyaha	Md. C/laahi Xuseen Cige Gudoomiyaha Gudidda
30/08/2020	Warbixinta Gudidda Arrimaha Gudaha ee Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerkaa Guud ee Doorashooyinka iyo D. Codbixiyayaasha	Md. C/laahi Xuseen Cige Gudoomiyaha Gudidda

Xeerarka uu Goluhu Ansixiyay

No	Mashruuc Sharciga la Ansixiyay	Taariikhda	Halka loo gudbiyay
-----------	---------------------------------------	-------------------	---------------------------

1.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka La-dagaalanka Maandooriyaha	16/08/2020	Golaha Guurtida
2.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka ka hortaga Kufsiga iyo Sinada	25/08/2020	Golaha Guurtida
3.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo D. C/bixiyayaasha	27/09/2020	Golaha Guurtida

Xeerarka Dhaqangalay ee Goluhu Ansixiyay

No	Mashruuc Sharciga la Ansixiyay	Taariikhda	Halka loo gudbiyay
4.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka La-dagaalanka Maandooriyaha	20/10/2020	Madaxweynaha
5.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo D. C/bixiyayaasha	20/10/2020	Madaxweynaha

Labada Aqal ee Baarlamaanka oo si Wada-jir ah uga jawaabay Qaraar Maxkamada sare ka soo Saartay Xeer dhaqangalay.

27/08/2020 ayaa Maxkamada Sare go'aan Sumadiisu tahay **MS/GMS/G-7/419/2020** ka soo saartay Wax ka badalka iyo Kaabista Nidaamka Garsoorka, go'aankaas oo ay ku laashay **Waxka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Dhaqan-galka ah ee Nidaamka Garsoorka Somaliland (Xeer.Lr.24/2020).**

Shir-gudoonka labada Aqal ee Baarlamaanka (Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiilada) warqad jawaab celin ah oo kaga jawaabtay go'aankaas Maxkamada Sare oo ay si wada jir ah u wada saxeexeen Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Md. Baashe Maxamed Faarax iyo Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Guurtida Md. Siciid Jaamac Cali taariikhdu markay ahayd **31/08/2020**, warqadaas Baarlamaanka Jawaabta Sharci ee qaraarka maxkamada sare oo Sumadiisu **GW/G/22/110/202**, Wuxuu Baarlamaanku si sharci u naqdiyay qaraarkaas Maxkamada Sare ku laashay Waxka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Dhaqan-galka ah ee Nidaamka Garsoorka Somaliland (Xeer.Lr.24/2020).

Wuxuu Baarlamaanku qaraarka jawaab celintiisa ku sheegay in Qararaarka ay maxkamaddu soo saaratay, ee ay u cuskatay asbaabaha kor ku xusan aanu ahayn mid xeerka waafaqsan, isla markaana aanu sugnayn dhismaha dawcad dastuuri ah oo u dhaxaysa laba dhinac oo isku khilaafsan nuxurka Xeerka Waxka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Ee Xeer.Lr/24/2020.

Maxkamadda dastuuriga ah waxay aas-aasmaysaa sida waafaqsan qodobkan **36^{aad}** ee xeerka Waxka-beddelka iyo kaabista Nidaamka Garsoorka Xeer.Lr.24/2020, sidaa darteed qaraarka ay maxkamaddu soo saartay ma kala caddaynayo Makamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuurka ta qaraarka soo saartay

Sidoo kale qaraarka ay Maxkamaddu soo saartay wuxuu ka hor imanayaa awoodaha Maxkamadda Dastuuriga ee ku tilaamaman qodobka **36^{aad}** ee Xeerka Waxka-beddelka iyo Kaabista Nidaamka Garsoorka Xeer.Lr.24/2020 oo u dhigan ssidan,

1. Dhegeysiga murannada ku saabsan waafaqsanaanla'aanta Dastuurka eexeer dhaqan-galay ama qodob xeer oo dhaqan-gal ah, amaba fal xukuumadeed;
2. Macnaynta iyo fasiraadda Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka, marka laysku qabto nuxurka ujeeddadooda ama ay muuqato is khilaafsanaantoodu;
3. Fasiraadda iyo tirtiridda xukunnada garsoorka ee dhaqan-galay ee khilaafsan Dastuurka, Shareecada Islaamka ama xeerarka dalka;

Sidaa darteed, qaraarka ay Maxkamadda Sare soo saartay ma laha aas-aas sharci mana waafaqsana Xeerka iyo dastuurka.

Gebagabadii, Maxkamadda Sare waxay ka tallaabsatay awoodaha sharci ee qodobbada **36^{aad}**, **37^{aad}** iyo **38^{aad}** ee ku tiilmaaman Xeerka Waxka-beddelka iyo Kaabista Nidaamka Garsoorka Xeer.Lr.24/2020

Maxkamadde Sare waxay sidoo kale jebisay qodobbada **97^{aad}** faqaraddiisa **2^{aad}** iyo **98^{aad}** faqradda **1^{aad}** Xarafka J Ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Maxkamaddu waxay sidoo kale laashay guud ahaan mabaa'diida iyo hannaanka nidaamka garsoorka iyo doorka hay'adaha dastuuriga ahi ku leeyihiin maaddaama oo ay guud ahaan xeerkan ahmiyadda ballaadhan leh laashay.

Xeerarka Golaha horyaal ee Qabyada ah

B. Xeerarka Gudiyadu gacanta ku hayaan

No	Magaca Xeerka	Gudidda gacanta ku heysa
1.	Xeerka Dhaqaalaha Shidaalka	Gudidda Dhaqaalaha
2.	Xeerka Sahaminta iyo Soo saarista Shidaalka	Gudida Deegaanka & Kheyradka Dabiiciga
3.	Wax ka badalka Xeerka Saxaafada	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta
4.	Xeerka ka hortaga Argagaxisada	Gudidda Arrimaha Gudaha
5.	Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruuraha	Gudidda Cadaalada iyo Garsoorka
6.	Xeerka Caasimada	Gudidda Arrimaha Gudaha
7.	Xeerka Hay'adda Wadooyinka	Gudidda hawlaha Guud iyo Gaadiidka
8.	Wax ka badalka Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah	Gudidda Arrimaha Bulshada
9.	Xeerka Xakameynta ka Ganacsiga iyo Tahriibka Dadka	Gudidda Arrimaha Gudaha
10.	Xeerka Hay'adda Dekadaha	Gudidda Dhaqaalaha
11.	Xeerka Aaga Cashuuraha ka caagan	Gudidda Dhaqaalaha
12.	Xeerka Diiwaangalinta Shirkadaha Aaga Cashuuraha ka caagan	Gudidda Dhaqaalaha
13.	Xeerka Hay'adda Caymiska	Gudidda Dhaqaalah
14.	Xeerka Liisamada Ganacsiga	Gudidda Dhaqaalah
15.	Xeerka Shaqaalaha Dawlada	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta

T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

1.	Wax ka badalka Xeerka Maamuuska M/weynaha iyo Mudanayasha Baarlamaanka	(Madaxtoyada ka soo noqdey)
2.	Wax-ka baddalka Xeerka Tamarta	(Madaxtoyada ka soo noqdey)
3.	Wax ka badalka Xeerka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda	Golewaynaha

Waxqabadka Guddiyada Golaha Wakiilada

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah.
4. Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta.
5. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
6. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta.
7. Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgelyada.
8. Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka.
9. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.
10. Gudidda Nabadsugida iyo Nabadsugida.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan, waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabaddoodii iyo masuuliyiintii ay ka soo talo bixiyeen Ansixintooda.

Gudidda Joogtada iyo Anshaxa



Sida uu waajibinayo Dastuurka Qaranku iyo Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladda waxay Guddida Joogtada iyo Anshaxu hawlaha Golaha sii wadaan muddada uu Goluhu fasaxa ku jiro. Hadaba, Guddida Joogtaduud Mudadii Fasax lagu maqnaa ee ka dambaysay kal-fadhigii 43aad waxay kulamo xogwaraysi iyo waydiimo ah la yeelatay Madaxda Hay'addahan soo socda:-

1. 31/10/2020 Komishanka Doorashooyinka Qaranka

2. **10/11/2020** Gudoomiyaha Hay'adda u diyaargarawga Aafooyinka iyo Kaydka Raashinka
3. **15/11/2020** Wasriika Wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo Horumarinta Kalluumaysiga

Sidoo kale, **19/11/2020** Gudiddu Joogtada iyo Anshaxu waxay Kormeer shaqo ku tagtay Gobolka Tog-dheer, kormeerkaas oo qaatay mudo saddex cisho ah Gudiddu waxay ugu kuurgashay xaalaga Gobolkas miyi iyo Magaaloba, iyadoo Kulamo xogwaraysi la yeelatay Badhasaabka Gobolka Tog-dheer, Maayarka Burco, isla markaana waxay soo kormeertay deegaanada miyiga gaar ahaan Banka Aroori.

Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah

09 August 2020 Gudida Deegaanka iyo khayraadka Dabiiciga ah ee Goluhu waxay ugu yeedhay isla markaana kulan la yeelatay shirkadaha Laydhka bixiya ee Sompower, Telesom iyo Gaafane waxna ka waydiiyey adeega ay bulshada u hayaan iyo sababta ay qiimaha laydhka Shacabka uga jebin waayeen.



Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

18/11/2020 Gudidda Cadaaladda, Garsoorka iyo Xuquuqal Insaanku waxay Safar Kormeer ku tagtay Gobolada Gabilay iyo Awdal, safarkaas oo qaatay mudo 3 cisho ah, waxay kulamo kala duwan la yeelatay Badhasaabka Gabiley, Gudoomiyaha Maxkamada Gobolka Gabiley, Taliye xigeenka Jeelka Gabiley, Taliyaha Jeelka Boorama iyo Taliye xigeenka Saldhiga Dhexe ee Boorama, iyadoo sidoo kale soo kormeertay xarumahooda, wuxuuna Ujeedda Kormeerkaasi ahaa:-

- In Gudiddu Xog buuxda ka hesho Maxaabiista kala duwan ee Jeelasha iyo saldhigyada ku jirta si ay u hubiso Cadaalada iyo Xuquuqda Maxaabiista.
- Inay Xog ogaal u noqoto Caqabadaha iyo Baahiyaha ka jira Jeelashaas si Gudiddu uga diyaariso Warbixin ay la wadaagto Golewaynaha iyo Hay'adaha Cadaalada, Garsoorka iyo Xuquuqal Insaanka Dawlada u qaabilsan. Iyo

- In Gudiddu ku dabagasho Hay'adaha Garsoorka, Cadaaladda iyo Maamulka Jeelasha Gudashada shaqadooda

Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

- **16/09/2020** Gudidda Dhaqaaluhu waxay kulan dadweyne (Public hearing) u qabatay Xeerka Hay'adda Caymiska Qaranka oo ay gacanta ku haysay, kulankaas oo ujeedadiisu ahayd lafagurida iyo kala tashiga dadweynaha gaar ahaan hay'addaha khuseyso, waxaana kulankaas ka soo qayb-galay dad kala duwan oo ka kala socday Wasaaradaha, shirkadaha caymiska, aqoonyahan iyo sharci-yaqaano, waxaana lagu qabtay Hotel Maansoor Hargeysa.
- **Bishii August 2020** Gudiddu iyadoo Gudaneysa Waajibaadkeeda Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay waxay kormeer ku soo martay illaha Dakhliga ee Dalka iyadoo Gudiddu isu qaybisay laba qaybood, qayb u baxday Gobolada Bariga iyo qayb u baxday Gobolada Galbeedka kormeerkaas oo u jeedadiisu ahaa u kuur galida illaha Dakhliga iyo xogogaal u noqoshada isbadalka korodh iyo hoos u dhac ee jira.

Guddida Arimaha Bulshad iyo diinta

12 July 2020 Gudida Arimaha Bulshada ayaa kulan wadatashi ah u qabtay wax ka bedelka iyo kaabista Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah. Kulankan wada-tashiga ah (public hearing) oo ay Gudidu u qabatay Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ayaa socday laba maalmood waxaana lagu qabtay Magaalada Hargeysa, waxaana ka soo qayb-galay Shirkadaha waaweyn, Ururada Arrimaha Bulshada, Hay'addaha Dawlada ee uu khuseeyo sida Wasiirka Wasaarada Arimaha bulshada Qoyska iyo shaqogelinta, Ardayda Jaamacadaha iyo aqoonyahan kale,



Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada

Gudidda Arrimaha Guduhu Waxay Golewaynaha u soo gudbisay intii lagu jiray Kal-fadhigii 43aad laba oo kala ahaa **Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangalinta Codbixiyayaash iyo Wax ka badalka Xeerka la-dagaalanka Maandooriyaha**, iyadoo Gudidda labadaas xeerba golaha warbixin ka siiyay, ka dibna Goluhu dood dheer labada Xeerba Ansixiyay.

11 August 2020 Gudidda Arrimaha Gudaha Difaaca iyo Nabadgalyada ee Golaha wakiilada waxay oo ay la yeelatay kulan is xog-waraysi ku saabsan arimaha doorashooyinka iyo Xeerka Doorashooyinka oo Golaha Wakiiladu uu gacanta ku hayo Komishanka Doorashooyinka Qaranka, kulankaas oo ka dhacay Xafiiska Gudidda ee Golaha. Kulankaas oo ku soo dhamaaday is afgarad iyo in wixii caqabado doorashada ku saabsan looga wada shaqayn lahaa dhinacyada ay khusayso, sidoo kale waxa uu Gudoomiye Gudiddu u mahad naqay soo ajiibka ay soo ajiibeen yeedhitaankii ay u yeedheen Gudiddu.



12 August 2020, Gudida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada ee Golaha waxay kulan hawleed shaqo ay la yeesheen Taliyaha Ciidanka Booliska Jamhuuriyada Somaliland Sareeye Guuto Maxamed Aaden Saqadhi (Daba-galle) iyo ku xigeenka Ciidamada Booliska. Warbixin Taliyuhu gudida siiyey ka dib ayay xildhibaanada Gudidu su'aalo waydiiyeen, taliyuhuna si waafiya ayuu ugu faah-faahiyey xogihii la waydiiyey

Codsi Ka mid noqoshada Baarlamaanka Ururka Barwaaqo sooranka.

04/08/2020 ayaa Golaha Wakiiladu ansixiyay go'aan codsi ah oo uu doonayo inuu u gudbiyo Baarlamaanka Ururka Dalalka Barwaaqo Sooranka (Common Wealth Parliament Association CPA) si uu Baarlamaanka Somaliland uga mid noqdo, wuxuu Goluhu sheegay madaama uu si buuxda u buuxinayo shuruudaha ka mid noqoshada Ururkaas, isagoo goluhu cod aqlabiyada ku ansixiyay codsigaas.

Wuxuu Goluhu aad ugu mahadnaqay ururkaas oo shirwaynihii labadii sano ee u dambeeyay uu ku casuumay Golaha Wakiilada kana qayb-galeen Mudanayaal ka socda, iyadoo sanadkan Shirwaynihii Ururka CPA oo ka dhacaya Caasimada Dalka Kampala ay Golaha Wakiilada uga qayb-galeen Wafti uu hogaaminayo Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Md. Axmedyaasiin Sh. Cali Ayaanle, Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku-xigeenka Gudidda Arrimaha Dibada Md. Axmed Cabdi Kijaandhe iyo Md. C/casiis Ismaaciil Ducaaale, Gudoomiyaha Gudidda Deegaanka Md. Maxamed Yuusuf Waabeyo iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle.

Ugu dambeyn, wuxuu Goluhu ka codsaday inay ka aqbalaan codsiga ka mid noqoshada oo micne wayn ugu fadhida si kor ugu sii qaado horumarka xidhiidhka siyaasadeed ee dalalka ururkaas ku bahoobay, isla markaana kala qayb-qaato qiimaha nidaamka dimuqraadiga oo Somaliland uga hirgalay si buuxda.

Go'aankii Goluhu ku taageeray Xidhiidhka Somaliland iyo Taiwan

Kal-fadhigii 43^{aad}, fadhigiisii 21^{aad} **12 September 2020** wuxuu Golaha Wakiiladu soo saaray qaraar uu ku taageerayo heshiiska iyo xidhiidhka Somaliland iyo Dawlada Taiwan, go'aankaas oo ahaa:-

1. Inuu Golaha Wakiiladu uu taageero buuxda siiyo heshiiska Xidhiidhka labada Dawladood ee Somaliland iyo Taiwan.
2. Inuu Goluhu sidoo kale taageersan yahay Xeerka heshiiska dawlada Taiwan iyo Somaliland.
3. Inuu Goluhu uu u mahadnaqo taageerada uu siiyay Golaha La-talinta Nabadgalyadda ee Dalka Maraykanka (US Security Council) heshiiska Xidhiidhka dawlada Taiwan iyo Somaliland.
4. Inuu Golaha Wakiiladu uu si rasmi ah uga mid noqdo ururka Midawga Baarlamaanadda FORMOSA ee ka shaqeeya wanaajinta xidhiidhka wadamada Afrika iyo Taiwan.

Wufuudihii Golaha Yimi

Shir-gudoonka Golaha oo la kulanmay Safiir ku-xigeenka Dalka Taiwan

26 August 2020 Guoomiyaha Golaha Wakiilada JSL Mudane Baashe Maxamed Faarax oo Ay weheliyaan Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad Md. Axmedyaasiin Sh. Cali Ayaanle, Gudoomiyaha Gudida Arimaha Dibeda Md Axmed Cabdi Kijaandhe, G. ku-xigeenka Gudiddaas Md Cabdicasiis Ismaaciil Ducaale yo Xoghayaha Guud ee Golaha Cabdirisaaq Siciid Ayaanle ayaa kulan la qaatey safiir Ku-xigeenka Wadanka Taiwan u Fadhiya Somaliland Mr Nabil Chen-Chi Wu.



Kulankaas oo Safiir Ku-xigeenka Wadanka **Taiwan Mr Wu** u sharaxay horumarka baaxada leh ee Somaliland ka hana qaadey 30 sanno ee u danbeeyey isla markaana uga xog waramay sida dalka Taiwan ay uga go'an tahay inay u xoojiyaan xidhiidhka ay somaliland la sameeyeen.

Sidoo kale wuxuu sheegay sida uu ula dhacssan yahay horumarka, nabada iyo Dimuqraadiyada qaan-gaadhka ah ee Somaliland ku naaloonayso isagoona sheegay in Wadamo badan oo aqoonsi buuxa haysta ay Somaliland ka horumarsan tahay.

Gudoomiyaha Golaha Mudane Baashe ayaa guud ahaan warbixin ka siiyey isla markaana xusay kaalinta Somaliland kaga jirto nabada iyo xasiloonida Gobolka. waxa kale oo uu Gudoomiyuhu xog ka siiyay safiirka maraaxilkii kala duwanaa ee Golaha Wakiilada Somaliland soo maray iyo weliba doorka Baarlamanka Somaliland ku leeyahay horumarka Qaranka, wuxuuna Kulankaasi uu ku soo dhamaaday si qurux badan oo is faham dheeraad ah lagu abiuray.

Kulan Gudoomiyuhu la yeeshay Madax UNDP ee Somaliland iyo Somaliya

26 October 2020 Gudoomiyaha Golaha wakiilada JSL Mudaane Baashe Maxamed Faarax ayaa kulan la yeeshay Wakiilka Somaliland iyo Somalia ee Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Horumarinta Mashaariicda UNDP Mr. Jocelyn Mason.

Kulankan ayaa wakiilka waxa ku wehelinayay Saraakiil ka socotay Xafiiska UNDP ee Somaliland oo kala ahaa Mascuud iyo Samiira iyo sidoo kale Ku-simaaha Xoghayaha guud ee Golaha ahna Xoghaye kuxigeenka Jamaal Jaamac Xasan iyo La-taliyaha Golaha ee Arimaha Deibeda Cabdirisaaq Ibrahim Maxamed

Kulanka ayay labada dhinac iskaga xog waraysteen wadashaqaynta Hay'adda UNDP iyo Golaha iyo sidii kor loogu sii qaadi lahaaba.



Gudoomiye Baashe ayaa uga xaal waramay sida doorashadii goluhu kaabiga u soo saran tahay iyo inay jecel yihiin inay sideeda ku qabsoonto iyadoo uu u sheegay in Dawlada Somaliland bixin doonto dhaqaalaha ku baxaya haddii beesha caalamku gacan ka geysan weydo.

Waxa uu ku booriyey Hay'adda UNDP inay la sii shaqayso oo sidii ay iyaga ula shaqeeyeen Golayaasha cusub ee yimaada ay xoojiyaan sidii ay shaqadooda u qabsan lahaayeen.

Wakiilka ayaa Somaliland ku bogaadiyey sida ay mar walba uga goan tahay una qabsadaan doorashooyin dimuqraadi ah isla markaana yagleelay nidaam Dawladnimo oo cago adag ku taagan dalkoodana xasilooni taama ka abuuray, waxa uu gudoomiyaha ku bogaadiyey sida uu faahfaahinta dheer uga siiyey hawlihii ay u socdeen, sanadka danbena rajaynayo in doorasho dhacdo goleyaal cusub lagu soo doorto.

Safaradii Goluhu Dibada Dalka ugu baxay

Waftigii Golaha ee ka qayb-galay Shir-waynihii Dalalka Barwaaqo Sooranka

20 October 2020 Wefti ka socda Baarlamaanka Somaliland oo uu hogaaminayo Gudoomiye ku-xigeenka 1^{aad} Mudane Axmedyaasiin Sh. Cali Ayaanle ayaa gaadhay tagay Dalka Uganda ee Kampala si ay uga qayb-galaan Shir sanadeed Ururka Baarlamaanada Dalalka Barwaaqo Sooranka. Waxaana Weftiga ka mid ah oo kale Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Dibada Axmed Cabdi Kijaandhe, Gudoomiyaha Gudida Deegaanka iyo khayraadka Dabiiciga ah Md. Maxamed X Yuusuf Waabeeyo, Gudoomiye ku-xigeenka Gudida Arimaha Debeda Cabdicasiis Ismaaciil Ducaale iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada Md. Cabdirisaaq Siciid Ayaanle.



Weftiga ayaa sidoo kale intii ay dalka Ugaandha ku sugnaayeen ka qayb galay kulamo muhiim ahna la yeeshay Madaxda dalalkii ka soo qayb-galay iyo Xaflado si gaara loogu martiqaaday.

Mudanayaal Geeriyooday.

(Eebe ha u naxariistee) Kal-fadhigii 43^{aad} iyo Mudadii ka dambeysay waxa Golaha ka geeriyooday laba Mudane Rabi Naxariistii Jano ha ka waraabiyo, qabriga ha u nuuriyo Ehel, Qaraabadiisi iyo Qarankana Samir iyo Iimaan ha ka siiyee, kuwaas oo kala ahaa:-

No	Mudanayaashii geeriyooday	Taariikdii geerida	Mudanayaashii badalay
1.	Md. Axmed Maxamed Nuur	23 Sept 2020	Md. Jamaal Maxamed Warsame
2.	Md. C/kariim Aw Cali Shabeel	13 Oct 2020	Md. Axmed Cabdi Muuse Cige

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xog-hayaha Guud ee Golaha Wakiilada.